

WARQAD KU SOCOTA QOYSKA

Qoysaska Qaaliga ah:


Sannadkan, fasalkayagu waxaa uu aad ugu faraxsan yahay ka qaybgalka ABCs ee S.T.E.M. Barnaamijka Ardayga Todobaadka!

ABCs ee S.T.E.M. waa mid fudud, madadaalo iyo soo jiidasho leh oo lagu baro carruurta, qoysaskooda iyo kuwa ay jecel yihiin fikradaha S.T.E.M. (oo u taagan Sayniska, Tignoolajiyada, Injineernimada & Xisaabta).

Waxaa ku jira boorsadan dhammaan agabka loo baahan yahay si loogu raaxaysto ABC-yada S.T.E.M. Khibrada Ardayga Todobaadka. Uu isticmaal tilmaamaha ku yaalla kaarkan gadashiisa, iyo boorka Ardayga toddobaadka ee hage, ku raaxayso hawlaha kala duwan si wadajir ah iyo xawli adiga iyo qoyskaaga kugu habboon toddobaadka oo dhan. Maalin kasta, ardaygaagu ha ku qoro hawlaha uu qabtay boorka

Boorarka Ardayga Todobaadka la dhammeeyay waxa lagu soo celinayaa fasalka dhammaadka toddobaadka. Ardaygaagu wuxuu markaas ka dib soo bandhigi doonaa fasalka oo dhan ABCs ee S.T.E.M. toddobaadka madadaalada ee qoyska oo dhan isagoo isticmaalaya boorkiisa Ardayga ee toddobaadka oo dhammaystiran. Agabka kale ee ku jirto boorsadan adigaa iska leh oo hayso kuna raaxeyso.

Waad ku mahadsan tahay taageeradaada! Haddii aad jeclaan lahayd inaad wax badan ka ogaato ABC-yada S.T.E.M. oo aad hesho ilo dheeraad ah oo loogu talagalay waalidka kuna saabsan barnaamijka, fadlan sawir koodka QR Si aad uu hesho muuqaal horudhac uu ah barnaamijka.



Dhammaadka todobaadka, fadlan hubi in ardaygaaga uu ku soo laabtay dugsiga Isagoo sita Boorka Ardayga Todobaadka oo dhammaystiran. Agabka intiisa kale adigaa iska leh oo hayso!

Hagayaasha

Dhammaystir mid kasta oo ka mid ah hawlaha soo socda adiga oo isticmaalaya agabyada ku jira Boorsada uu Ardaygaaga uu Qaadanaayo Guriga. Ku qor dhammaan hawlaha boorkaaga toddobaadka ee Ardayga. Hawlaha waxaa la dhammeeyn karaa maalin kasta ama xawliga ku habboon jadwalkaaga.

Hawsha Koowaad: ABC-yada wakhtiga

TILMAAMAHA: Xilliga cuntada, raadi xarfaha magacaaga koowaad ee ABCs STEM ee derinta. Kuwa kale iyagana ha ka raadiyaan magacyadooda, sidoo kale! Dhameystir Qeybta Koowaad ee boorka Toddobaadka ee Ardaygaaga.

AGABYADA: ABC's STEM ee derinta, Boorka Ardayga Toddobaadka.

Hawsha Labaad: ABC-yada STEM Reading

TILMAAMAHA: La akhriso ABC-yada Buugga STEM xubin qoyska kamid ah ama saaxiib. Dhameystir Qaybta Labaad ee boorka Ardaygaaga Toddobaadka.

AGABYADA: ABC's STEM ee Buugga, Boorka Ardayga Todobaadka.

Hawsha Saddexaad: Ciyaarta ABCs STEM

TILMAAMAHA: La ciyaar ABC-yada STEM kaarka ciyaarta xubin kamid ah qoyska ama saaxiib. Dhameystir Qaybta Saddexaad ee Boorka Ardaygaaga Todobaadka.

AGABYADA: ABC's STEM ee Kaarka Ciyaarta, Boorka Ardayga Todobaadka.

Hawsha Afaraad: Waxqabadka ABCs ee STEM

TILMAAMAHA: Samee tijaabo ama hawl ka samee xirmada ABCs STEM ee Tijaabada & Hawsha, ama samee mid adiga kuu gaar ah! Dhameystir Qaybta Afaraad ee Boorka Ardaygaaga Todobaadka (waxaa jira laba qaybood).

AGABYADA: ABC-yada STEM ee Tijaabada & Xirmada Hawsha, Boorka Ardayga Todobaadka. **FIIRO GAAR AH:** Hawlaha qaarkood waxay u baahan karaan agab dheeraad ah, fadlan tixraac hawlaha ku jira.

Dhammaadka todobaadka, fadlan hubi in ardaygaaga uu ku soo laabtay dugsiga Isagoo sita Boorka Ardayga Todobaadka oo dhamaystiran.